THE EDUCATION STATE

SCHOOLS

QORSHAHA ARIMAHA GAARKA AH EE DUGSIYADA

Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka (oo ay ku jiraan dhammaan dugsiyada dawlada Victoria, bartamaha iyo xafiisyada gobolada) waxay qiimeeyaan arimaha gaarka ah ee qof kasta waxaana ka go'an ilaalinta macluumaadka ay dugsiyadu ururiyaan.

Dhammaan shaqaalaha, adeeg bixiyayaasha (qandaraaslayaasha) iyo wakiilada, (haddii ay lacag siiyaan ama aysan siin) wasaaradda, iyo dugsigaan dawlada Victoria (**dugsigeena**), waa inay raacaan qorshahan iyo sharciga arimaha gaarka ah ee Victoria.

Maamulka dugsiyada dawlada Victoria ee 'macluumaadka shakhsiyeed' iyo 'macluumaadka caafimaad' waxaa u maamula *Xeerka Ilaalinta Macluumaadka Arimaha gaarka ah ee 2014* (Vic) iyo Xeerka Diiwaanka Caafimaadka *2001* (Vic) (si wadajirta), **Sharciga arimaha gaarka ah ee Victoria).**

Qorshahani wuxuu sharxayaa sida dugsigeenu u ururiyo oo u maareeyo macluumaadka caafimaad iyo shakhsiyeed, oo waafaqsan sharciga arimaha gaarka ah ee Victoria.

NOOCA HADDA JIRA EE QORSHAHAN

Qorshahan si joogta ah baa dib loogu eegayaa loona cusbooneysiinayaa si loo tixgeliyo shuruucda cusub iyo tignoolajiyada iyo jawiga dugsiga ee isbedelaya markii loo baahdo. Fadlan hubi inaad heysato nooca hadda ee qorshahan.

QEEXITAANADA

Macluumaadka shakhsiyeed waa macluumaad ama fikrad,haddii uu run yahay amase uusan ahayn, ku saabsan qof aqoonsigiisa la arki karo, ama si macquul ah looga xaqiijin karo macluumaadka ama fikrada – ee u diiwaangashan qaab kasta. Tusaale, qofka magaciisa, cinwaankiisa, lambarka taleefankiisa iyo taariikhda dhalashada (da'da). Macluumaadka aan lagu garaneynin ee ku saabsan ardeyda ayaa sidoo kale noqon kara macluumaad shakhsiyeed.

Macluumaadka caafimaadku waa macluumaad ama feker ku saabsan qofka maskaxdiisa ama jirkiisa ama iinta iyo caafimaadka nafsadeed, kaasi sidoo kale waa macluumaad shakhsiyeed – haddii uu qoraal yahay ama uusan ahayn. Tan waxaa ka mid ah macluumaadka fekerka ku saabsan qofka xaaladiisa caafimaad iyo taariikhda daawo, xaalada tallaal iyo xasaasiyada, iyo sidoo kale diiwaanada la talinta.

Macluumaadka xasaasiga ah waa macluumaad ama feker ku saabsan tiro xaalado khaas ah, oo ay ku jiraan qofka jinsiyadiisa asal ahaaneed, fekerkiisa siyaasadeed ama ciduu xiriir la leeyahay, diin ahaan wuxuu rumeysan yahay ama uu xiriir la leeyahay, falsafada uu rumeysan yahay, galmada uu doorbidayo ama waxqad; ama diiwaanka dembiyeed. Waxaa sidoo kale ka mid ah macluumaadka caafimaadka.

MACLUUMAAD SIDEE AH AYAAN URURINEYNAA?

Dugsigeenu wuxuu ururiyaa nooca macluumaadka ah ee soo socda:

- macluumaad ku saabsan ardeyda iyo qoyskooda, oo ay bixiyeen ardeyda, qoysaskooda iyo kuwa kaleba
- macluumaad ku saabsan shaqa codsadayaasha, shaqaalaha, iska wax u qabsadayaasha, booqdayaasha iyo kuwo kale.

SIDEE BAAN U URURINAA MACLUUMAADKAN?

Dugsigeena ayaa u ururiya macluumaadka siyaalo kala duwan oo ay ka mid yihiin:

- qof ahaan iyo taleefanka: oo ah ardeyda iyo qoysaskooda, shaqaalaha, iskaa wax u qabsadayaasha, booqadayaasha, shaqo codsadayaasha iyo kuwo kale
- dukumiintiyo warqad iyo elektaroonigba ah: oo ay ku jiraan codsiyada shaqada, iimeylada, qaansheegatooyinka, foomamka diiwaangelinta, warqadaha dugsigeena, foomamka ka raali ahaanshaha (tusaale: diiwaangelinta, fasaxa gaaban, foomamka ka raali ahaanshaha Adeegyada Taageerada Ardeyga) , website ka dugsigeena ama isgaarsiinta bulshada ee dugsigu kontaroolo
- adoo adeegsanaya aalada interneetka: sida apps iyo software ka kale ee uu isticmaalo dugsigeenu

- adeegsiga kamara kasta oo CCTV ah oo ku taal dugsigeena.

Ogeysiisyada ururinta

Marka dugsigeenu ururiyo macluumaad kugu saabsan adiga, dugsigeenu wuxuu qaadaa talaabooyin si uu kuula taliyo adiga arimaha qaarkood. Tan maxaa ka mid ah ujeedooyinka ururinta, iyo sidii aad u heli lahayd, cusbooneysii oo sax macluumaadka adiga kugu saabsan ee lagaa hayo. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan ardeyda iyo qoysaskooda, ogeysiiska ururinta waxaa la siiyaa waalidiinta (ama ardeyda yar yar ee qaangaarka ah) marka la diiwaangelinayo.

Macluumaadka aan lagaa qalqaalin ee adiga kugu saabsan

Waxaa laga yaabaa inuu dugsigeenu helo macluumaad ku saabsan adiga oo aanan qaadin wax tallaalooyin firfircoon oo lagu soo ururinayo. Haddii ogol yahay ama sharcigu u baahan yahay , dugsigeena waxaa laga yaabaa inuu hayo macluumaadka diiwaanadaan. Haddii aysan sidaas ayayn waanu tirtireynaa ama ka dhigeynaa macluumaadka mid aan lagugu aqoonsan markii suurtagal ah, sharcigu ogol yahay oo ay macquul tahay in sidaas la sameeyo.

WAA MAXAY SABABTA AAN MACLUUMAADKAN U URURINEYNAA?

Ujeeddada koowaad ee macluuaadka ku saabsan ardeyda iyo waalidkood loo ururinayo

Dugsigeenu wuxuu ururiyaa macluumaad ku saabsan ardeyda iyo qoysaska markii ay lagama maarmaan noqoto in:

- ardeyda wax la baro
- la taageero ardeyda caafimaadkooda, fiyoobaantooda maskaxeed iyo mulshadeedba.
- la fuliyo shuruudaha sharciga, oo ay ka mid yihiin:
    - qaadida talaabooyin macquul ah oo lagu yareynayo khatarta waxyeelada ardeyda, shaqaalaha iyo booqdayaasha ku ah ee si macquul ah loo arki karo (waajibaadka daryeel)
    - samee isbedel hagaajineed oo macquul ah ardeyda iinta leh (sharciga ka soo horjeeda midab kala sooca)
    - siinta goob shaqo oo nabadgelyo leh ammaana ah (sharciga ammaanka caafimaaadka mihnadeed)
- awood u sii in dugsigeenu:
    - kala hadlo waalidiinta wax ku saabsan arimaha dugsiga ee ardeyda iyo in loo dabaaldego dadaalka iyo meeshay gaareen ardeydu
    - ilaaliyo nidaamka wanaagsan iyo maareynta dugsigeena
- awood u siiya Wasaaraddu inay:
    - hubiso maareynta wax ku oolka ah , il waxbarasho u sameynta iyo maamulida dugsigeena
    - fuliso waajibaadyada iyo shaqooyinka dastuuriga ah
    - qorsheeyso, maalgeliyo, la socdo, sharciyeeyo iyo inuu qiimeeyo qorshayaasha Wasaaradda, adeegyada iyo shaqooyinka
    - raacdo shuruudaha soo warbixinta
    - baarto shilalka ka dhaca dugsiyada dhexdooda iyo/ama inay ka jawaabaan dalab sharciyeed kasta oo lagu sameeyo Wasaaradda, oo ay ku jiraan dugsiyadeeda wixii ka mid ah.

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee macluuaadka ku saabsan kuwa loo ururiyo

Dugsigeenu wuxuu ururiyaa macluumaad ku saabsan shaqaalaha, iskaa wax u qabsadayaasha iyo codsiilayaasha shaqada:

- si ay u qiimeeyaan ku haboonaanta codsiilaha shaqo ama iskaa wax u qabso ku shaqeyn
- si ay u maamulaan shaqada ama to administer employment or volunteer placement
- wixii ujeedo ceymis ah , oo ay ku jirto ceymiska wixii dadweynaha soo gaara iyo WorkCover
- in fuliyo waajibaadyo sharci oo badan, oo ay ku jiraan shaqada iyo waajibaadyada heshiiseed, sharciga ammaanka iyo caafimaadka mihnada iyo in la baaro shilalka
- si ay ugu jawaabaan dacwooyinka sharci ee dugsigeena lagu soo oogo/Wasaaradda.

GOORMAAN ISTICMAALNAA AMA BIXINAA MACLUUMAAD?

dugsigeenu wuxuu isticmaalaa ama u bixiyaa macluumaadka si waafaqsan sharciga arimaha gaarka ah ee Victoria, sidaan soo socota:

1. wixii ah **ujeedada ugu muhiimsan** – sida kor lagu soo qeexay

2. wixii la xiriira ee **ujeedada labaad** ee si macquul ah loo fili karo – tusaale, in awood loo siiyo golaha dugsiga inuu fuliyo ujeedooyinkiisa, shaqooyinkiisa iyo awoodihiisa

3. iyadoo la isticmaalayo ogeysiis iyo/ama ka raali ahaansho – oo ka mid tahay **ka raali ahaanshaha** la bixiyey marka diiwaangelinta iyo foomamka kale

4. markay **lagama maarmaan tahay in la yareeyo ama laga hortago hanjabaad daran** ee:
   - qofka noloshiisa, caafimaadka, ammaanka ama samafalkiisa
   - caafimaadka dadweynaha, ammaanka ama samafalka

5. marka **loo baahan yahay ama uu idmay sharcigu** –oo ay ka mid tahay natiijada waajibaadkeena daryeel, sharciga midab kala sooca ka soo horjeeda, caafimaadka mihnadeed iyo sharciga ammaanka, uga soo warbixinta waajibaadka wakaaladaha sida Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bani'aadamka iyo raacida ammarada maxkamadda ama maxkamad yareeyda taraybuunaalka, u yeerida ama u ogolaanta Boliiska Victoria

6. in la baaro ama la soo sheego **falka sharci daradda ah** ama markay macquul tahay lagama maarmaan ah ee ujeedada **dhaqangelinta sharciga** khaaska ah, oo ay ka mid tahay ka hortaga ama baaritaanka fal dembiyeedka ama falka daran ee aan habooneyn ee ama lagu matelayo wakaalada dhaqangelinta sharciga.

7. wixii ah **cilmi barista ama** ujeedooyinka **tirakkoobka dugsiga**

8. inay dejiyaan ama ka jawaabaan dalabka sharciga ah.

Wax lagu garto oo khaas ah (a CASES21 code) ayaa loo qoondeeyey ardey kasta si ay awood ugu siiso dugsiga inuu u qabto shaqooyinkiisa si wax ku ool ah.

BEDELAADA ARDEYDA EE U DHAXEYSA DUGSIYADA DAWLADA EE VICTORIA

Marka ardeyga laga aqbalo , ee uu u bedelanayo, dugsi kale oo dawlada Victoria ah , dugsigeenu wuxuu u gubiyaa macluumaadka ku saabsan ardeyga dugsigaas. Tan waxaa laga yaabaa inay ka mid tahay nuqulada diiwaanka ardeyga ee dugsiga, oo ay ku jirto wixii macluumaad caafimaad ah.

Tani waxay awood u siineysaa dugsiga ku xigga inuu sii wado bixinta waxbarashada ardeyga, inuu taageero caafimaadka iyo fiyoobaanta maskaxeed iyo bulsho ee ardeyga iyo inuu fuliyo waxa sharcigu uga baahan yahay.

NATIIJOOYINKA NAPLAN

NAPLAN waa qiimeynta qaran ee ardeyda fasalada 3, 5, 7 iyo 9, ee akhriska, qoraalka, luuqada iyo tiro barashada.

Marka ardeygu u bedesho dugsi kale oo dawlada Victoria ah, natiijadooda NAPLAN waxaa la awoodaa in loo wareejiyo dugsiga ku xigga.

Waxaa kale oo la sii socda, natiijada NAPLAN ee ardeyga waxaa la awoodaa in la siiyo dugsigii hore ee dawlada Victoria ee ardeyga si awood loogu siiyo dugsigaas inay qiimeeyaan barnaamijkooda waxbarasho.

KA JAWAABIDA CABASHOOYINKA

Wakhti dugsigeenu, iyo xafiisya goboleedka dhexe ee Wasaaradda, waxay ka helaan cabashooyin waalidka iyo kuwo kale. Dugsigeenu iyo/ama xafiisyada gobolka ama dhexe ee Wasaaradda waxay isticmaali doonaan oo ay bixin doonnaan macluumaadka sidii loo arko inay ku haboon tahay in looga jawaabo cabashooyinkan (oo ay ka mid yihiin cabashooyinka loo gudbiyey ururada ka baxsan ama wakaaladaha).

HELITAANKA MACLUUMAADKAAGA

Dhammaan shakhsiyaadka, ama wakiilkooda/ladooda),waxay xaq u leeyihiin inay helaan, cusbooneysiiyaan oo ay saxaan macluumaadka dugsigeenu uu ka hayo iyaga.

HELITAANKA MACLUUMAADKA ARDEYGA

Dugsigeenu wuxuu siiyaa oo kaliya warbixinta dugsiga iyo xiriirka caadiga ah ee waalidka xaq sharci ah u leh inay macluumaadkaas helaan. Codsiyada helitaanka ardey kale macluumaadkiisa waa in la sameeyaa codsiga Xoriyada Hadalka (FOI) Wasaaradda Uniga Xoriyada Macluumaadka (hoos eeg).

Xaaladaha qaarkood, wakiilka idman waxaa laga yaabaa inuu xaq u leeyahay macluumaadka ku saabsan ardeyga. Xaaladahan waxaa ka mid ah marka bixinta ma noqon doonto danta ugu wanaagsan ee ardeyga ama waxay jebin doontaa waajibaadka daryeelka ee ardeyga, waxay ka hor imanaysaa ardey qaangaar dhalinyaro ah rabitaankiisa ama wuxuu si aan macquul aan ahayn saameyn ku ah arimaha gaarka ah ee qof kale.

HELITAANKA MACLUUMAADKA SHAQAALAHA

Shaqaalaha dugsiga waxaa laga yaabaa inuu marka hore raadiyo helitaanka faylka shakhsiyeed isagoo la xiriiraya maamulaha. Haddii helitaan toos ah lagu siin, xubinta shaqaalaha waxaa laga yaabaa inay ka codsadaan Uniga Macluumaadka Xoriyada Haddalka ee Wasaaradda.

KEYDINTA IYO NABADGELINTA MACLUUMAADKA

Dugsigeenu wuxuu qaadaa talaabooyinka macquulka ah si looga ilaaliyo macluumaadka inuu lumo oo si khalad ah loo isticmaalo, iyo helitaan aan idmaneyn, wax ka bedelid iyo bixintiisba. Dugsigeenu wuxuu u keydiyaa diiwaanka elektarooniga ah iyo dhammaan warqadaha si nabadgelyo ah oo waafaqsan qorshaha maamulka diiwaanka Wasaaradda iyo heerarka nabadgelyo ee macluumaadka. Dhammaan diiwaanada dugsiyada waa la bixiyaa, ama lagu wareejiyaa Xafiiska Diiwaanka Dadweynaha, sida ay u baahan tahay Heerka Xafiiska Diiwaanka Dadweynaha ee khuseeya.

Markaad isticmaalaysid software iyo adeegbixiyayaasha la qandaraasay si loo maareeyo macluumaadka, dugsigeenu wuxuu qiimeeyaan tan iyadoo loo eegayo nidaamyada wasaaraddeed ee ku haboon. Hal tusaale oo tan ah waxaa weeye in shaqaalaha afgarashadiisu ee nidaamka dugsiga waa xoog badan tahay waxaa loo cusboneysiiynayaa si joogta ah, oo waafaqsan qorshaha afgarashada Wasaaradda.

CUSBOONEYSIINTA MACLUUMAADKAAGA

Waxaan iskudeyeynaa inaan hubino macluumaadka ku saabsan ardeyda, qoysaskooda iyo shaqaalaha waa sax, dhammeystiran oo cusub. Si aad u cusbooneysiisaan macluumaadkaaga, fadlan la xiriir xafiiska guud ee dugsigeena.

ARIMAHA GAARKA IYO FOI

Si aad u sameyso xiriirka codsiga FOI :

Unuga Macluumaadka Xoriyada Hadalka
Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka
2 Treasury Place, East Melbourne VIC 3002
(03) 9637 3961
foi@edumail.vic.gov.au

Haddii aad qabto weydiin ama cabasho ku saabsan arimaha gaarka ah, fadlan la xiriir:

Aqoonta, Laanta Diiwaanka iyo Arimaha gaarka
Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka
2 Treasury Place, East Melbourne VIC 3002

(03) 8688 7967
privacy@edumail.vic.gov.au